



# WARBIXIN SANNADEEDKA 2025

MACHADKA TABABBARKA GARSOORKA



JUDICIAL TRAINING INSTITUTE

Mogadishu, Somalia

# TUSMO

---

Farriinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare	01
Farriinta Xeer Ilaaliyaha	02
Farriinta Agaasimaha	03
Cogoldhig	04
Hordhac Tababbarrada	05
Tababar Wadajir ah oo loo qabtay Xeer-ilaaliyayaasha iyo Baarayaasha (ML & CFT)	06
Warbixinta Tababarka Dacwadaynta iyo Go'aaminta Dembiyada Tahriibka & Ka Ganacsiga Dadka	07
Wajiga 2aad: Warbixinta Tababarka Dacwadeynta iyo Garsoorista Dambiyada Ka Ganacsiga Bani'aadamka	08
Warbixinta Tababarka Garsoorayaasha iyo Xeer-ilaaliyayaasha ee ka Dhacay Qaahira	09
Tababarka Xeerka Qoyska iyo Xeerka Habka Madaniga	10
Tababarka Qorista Xukumada ee Garsooreyaasha	11
Tababarka Xeerka Habka Ciqaabta ee Garsooreyaasha iyo Xeerilaaliyayasha	12
Tababarka Gorgortanka Qirashada Dacwadaha Ciqaabta	13
Tababarka La-Dagaallanka Maalgelinta Argagixisada	14
Horumarinta Xogta Furan ee Dijitaalka ah (OSINT)	15
Tababarro Iyo Aqoon-is-weydaarsiyo La Qabtay – 2025	16



Farriinta

# Guddoomiyaha



Cadaaladdu waa mid ka mid ah tilmaamaha aan bulsho la'aanteed nabad ku ladayn, horumar iyo horusocdna aysan ku taamayn, amni iyo xasilloonina aysan arkeyn. Garsoorku waa bud-dhigga cadaaladda, waana tiir ka mid ah tiirarka dowladda, waxa uuna ka madax-bannaanyahay hay'adaha sharci dejinta iyo fulinta. Garsoorku waa ilaaliyaha nidaamka dawladda, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

Garsoorka oo tiir-dhexaad u ah dawlad dhiska, kalsoonida shacabka, nabadda iyo xasilloonida dalka ayaa mudadii u dambaysay ku tallaabsaday horumar weyn. Machadku wuxuu la jaanqaaday dadaal kaas taxanaha ah ee sare loogu qaadayo garsoorka dalka.

“

"Garsoorku waa ilaaliyaha nidaamka dawladda, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka."

**"Machadku wuxuu u taagan yahay tayaynta iyo sare u qaadidda xirfadda iyo aqoonta xubnaha garsoorka, diyaarinta manhaj waxbarasho sharci, dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha waxbarashada."**

Machadku wuxuu u taagan yahay tayaynta iyo sare u qaadidda xirfadda iyo aqoonta xubnaha garsoorka, diyaarinta manhaj waxbarasho sharci, dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha waxbarashada, tababbarka iyo cilmibaarista arrimaha muhiimka u ah garsoorka iyo guud ahaan xeerarka. Tababbarrada uu Machadku bixiyay waxay saamayn togan ku yeeshen tayada iyo xirfadda hawl-wadeennada garsoorka oo ay ugu horreeyaan garsooreyaasha, dacwad oogeyaasha iyo hawl-wadeennada kale ee garsoorka.

Waxaan xaqiijinayaa in dadaallada machadku ay miro dhaleen. Waxaan filayaa in machadku gaari doono guulo mug leh, gundhigna u noqon doona horumarinta iyo tayeynta garsoorka dalka. Muddadii koobnayd ee uu Machadku shaqaynayay waxa uu qabtay shaqooyin lataaban karo ayna ugu horeeyaan dejinta manaahij, qorshayaal, siyaasado, tababbarro iyo cilmibaarisyo.

## Baashe Yuusuf Axmed

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Soomaaliya



Farriinta

# Xeer Ilaaliyaha



“

*"Machadku wuxuu u taagan yahay tayaynta iyo sare u qaadidda xirfadda iyo aqoonta xubnaha garsoorka."*

**Machadka Tababbarka Garsoorka Soomaaliya waxaa la asaasay sanadkii 2021, wuxuuna wakiillo ku leeyahay dalka oo dhan. Machadku wuxuu u taagan yahay tayaynta iyo sare u qaadidda xirfadda iyo aqoonta xubnaha garsoorka, dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha waxbarashada, tababbarka iyo cilmibaarista arrimaha muhiimka u ah garsoorka iyo guud ahaan xeerarka.**

Muddadii yarayd ee uu Machadku jiray, waxa u qabsoomay hawlo baaxad leh oo ay ka mid yihiin: qiimeynta baahida tababbar ee garsoorka, diyaarinta manhaj waxbarasho sharci, dejin siyaasado istaaritijiyad iyo qorshayaal, soo saaridda cilmibaarisyo iyo tababbaro kala duwan oo uu siiyay xubnaha garsoorka heer federaal iyo heer dawlad goboleed.

***"Dadaalka wanaagsan ee Machadku wuxuu fududaynayaa kobcinta xirfadda garsooreyaasha, dacwad oogeyaasha iyo hawl-wadeennada kale ee garsoorka dalka."***

Waxaan bogaadinayaa hoggaanka Machadka sida ay uga go'an tahay xaqiijinta yoolka Machadka iyo tayaynta aqoonta iyo xirfadda hawl-wadeennada hay'adaha garsoorka dalka. Dadaalka wanaagsan ee Machadku wuxuu fududaynayaa kobcinta xirfadda garsooreyaasha, dacwad oogeyaasha iyo hawl-wadeennada kale ee garsoorka dalka, taas oo xaqiijinaysa hubinta iyo meelmarinta ujeedooyinka uu hiigsanayo Machadku.

Waxaan si milgo leh ugu mahadcelinaynaa hawl-wadeennada Machadka oo si firfircoon u gutay waajibkooda qaran, iyo cid kasta oo gacan ka geysatay hurumarinta hawlaha Machadka iyo guud ahaan garsoorka dalka.

**Sulaymaan Maxamed Maxamuud**

Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka



Farriinta

# Agaasimaha



“

"Hadafkayagu waa inaan dhisno garsoor tayo sare leh oo bulshada u adeega si hufan oo daacad ah."

Waxaa sharaf weyn ii ah inaan idin soo gudbiyo Warbixinta Sannadlaha ah ee Machadka Tababarka Garsoorka (JTI) ee sannadka 2025. Sannadkan waxa uu ahaa mid u asteysan horumar ballaaran iyo guulo la taaban karo oo laga gaaray tayeynta iyo kor u qaadista aqoonta bahda garsoorka dalka.

Machadku wuxuu xoogga saaray sidii loo hirgelin lahaa nidaam tababar oo casri ah, kaas oo ka jawaabaya baahiyaha degdegga ah ee garsoorka Soomaaliya. Waxaan ku guuleysannay inaan tababarro siino in ka badan 450 xubnood oo isugu jira garsoorayaal, xeer-ilaaliyayaal, iyo kaaliyayaal sharci, kuwaas oo ka kala yimid heer federaal iyo heer dowlad goboleed.

**"Machadku wuxuu hiigsanayaa inuu noqdo xarun heer sare ah oo cilmi-baaris iyo tababar sharci oo gobolka geeska Afrika laga aqoonsan yahay."**

Sidoo kale, waxaan xoojinnay iskaashiga caalamiga ah iyo kan maxalliga ah, anagoo la kaashanayna hay'adaha taageera garsoorka. Tani waxay noo suurtagelisay inaan helno khubaro iyo agab waxbarasho oo tayo sare leh. Mustaqbalka dhow, Machadku wuxuu hiigsanayaa inuu noqdo xarun heer sare ah oo cilmi-baaris iyo tababar sharci oo gobolka geeska Afrika laga aqoonsan yahay.

Ugu dambeyntii, waxaan u mahadcelinayaa dhammaan shaqaalaha Machadka, Guddiga sare ee Garsoorka, iyo la-hawlgalayaashayada horumarinta sida hagar la'aanta ah noola shaqeeyey sannadkan. Guulahani ma suurto galeen la'aantiin.

## Axmed Maxamuud Xasan

Agaasimaha Machadka Tababbarka Garsoorka  
Soomaaliya



# GOGOLDHIG

Machadka Tababarka Garsoorka Soomaaliya (MTG) waxaa la asaasay 8 Juulaay 2020. Xarrunta dhexe ee machadku waxay ku taal magaalada Muqdisho, wuxuuna xafiisyo ku leeyahay dhamaan dawlad goboleedyada dalka. Waajibaadka machadku waa horumarinta iyo bixinta barnaamijyo waxbarasho iyo tababaro loogu talagalay garsoorka dalka.

Ujeedka koowaad ee loo aasaasay MTG ayaa ah in uu noqdo xarun tababar, waxbarasho iyo cilmibaaris oo hay'adaha garsoorka dalka ka taageerta Machadku wuxuu tababaro iyo aqoon sharci siiyaa garsoorayaasha, xeer-ilaalinta iyo masuuliyiinta kale ee garsoorka. "Waaxda Tababarka iyo Waxbarashada Machadka" waxay ka mid tahay waaxaha Machadka Tababarka Garsoorka. Waaxdu waxay qabataa diyaarinta tababarada uu bixiyo MTG, isla markaana waxay dejisaa qorsha-howleedka sanadla ah.

Sidaas darteed, laga soo bilaabo bishii laad ilaa bishii 6aad ee sanadka 2025 waaxdu waxay qabatay tababaro iskugu jira kuwo heerka kowaad ah iyo kuwo heer takhasus ah. Si gaar ah, warbixintani waxay koobaysaa waxqabadka 6 bil ee sanadkan. Ugu dambayn, waxaan rajaynaynaa in uu MTG sii xoojiyo kobcinta tayada garsoorka Soomaaliya iyo xaqiijinta caddaalad hufan oo gaarta dhammaan bulshada Soomaaliyeed. Sidaas oo kale, waa muhiim in la joogteeyo wada shaqaynta hay'adaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah si loo xaqiijiyo iskaashi tayo ku kordhin kara horumarinta adeegyada garsoorka.



**Rajadda MTG waa sii xoojiyo kobcinta tayada garsoorka Soomaaliya iyo xaqiijinta caddaalad hufan oo gaarta dhammaan bulshada Soomaaliyeed.**



# 1.0 HORDHAC TABABARADA

Machadka Tababarka Garsoorka Soomaaliyeed (MTG/JTI) ayaa si joogto ah ugu hawlan **tayeynta iyo horumarinta awoodda hay'adaha caddaaladda** ee dalka, isaga oo fulinaya tababaro heer qaran iyo heer caalami ah oo lagu kobcinayo aqoonta, xirfadaha, iyo anshaxa garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyaasha, kaaliyeyaasha maxkamadaha, iyo saraakiisha kale ee garsoorka.

Intii lagu guda jiray sanadihii 2025, Machadku wuxuu hirgeliyay barnaamijyo tababar oo kala duwan, kuwaas oo diiradda saarayay dhinacyo muhiim u ah hannaanka caddaaladda. Tababaradani waxay isugu jireen kuwo gudaha dalka ka dhacay iyo kuwo dibadda ah, waxaana ka faa'iidaystay ka-qaybgalayaal ka kala socday Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada Federaalka.

 **Nidaamka Garsoorka & Shuruucda**

 **La-dagaallanka Lacag-dhaqidda**

 **Qorista Xukunnada & Maamulka**

 **Caddeymaha Dijitaalka ah (OSINT)**

 **Sharciga Qoyska**

 **Gorgortanka Qirashada Dacwadaha**

Ka-qaybgalka ballaaran wuxuu gacan ka geystay is-waafajinta habraacyada garsoorka, kor u qaadidda xirfadda shaqo, iyo xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha caddaaladda ee heerarka kala duwan.

“

*Guud ahaan, dadaalladan tababar waxay ka tarjumayaan doorka MTG/JTI ee ah inuu noqdo tiir-dhexaad lagu xoojinayo cadaaladda, isla-xisaabtanka, iyo ku-dhaqanka sharciga, si loo helo nidaam garsoor oo hufan, xirfad leh, isla markaana u adeegaya muwaadiniinta Soomaaliyeed si caddaalad iyo sinaan ku jirto.*

## 2. Tababar Wadajir ah oo loo qabtay Xeer-ilaaliyeyaasha iyo Baarayaasha (ML & CFT)

Machadku wuxuu qabtay tababar heer qaran ah oo socday muddo **saddex maalmood**, laguna qabtay magaalada Muqdisho, gaar ahaan **Hoteelka Jazeera** intii u dhaxaysay 26 ilaa 28 Janaayo 2025. Tababarkan ayaa diiradda saaray baadhista iyo dacwaynta kiisaska lacag-dhaqidda sharci darrada ah iyo maalgelinta argagixisada, iyadoo ujeedadu ahayd in la xoojiyo aqoonta iyo xirfadda saraakiisha sharciga ee ka hawlgala hay'adaha garsoorka ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

Waxaa sidoo kale tababarka bixinayay khuburo uu ka mid yahay ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud, Farxaan Xuseen Maxamed, iyo la-taliye sare oo ka socday xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud iyo Machadka Tababarka Garsoorka.



### 2.1. Ujeedooyinka Tababarka

Tababarka waxa uu lahaa ujeedooyin istiraatiiji ah oo ay ka mid yihiin: **(1)** in la bixiyo faham qoto dheer oo ku saabsan dambiyada ML iyo CFT; **(2)** in la xoojiyo habka baarista maaliyadeed ee ay hogaaminayaan dacwad-oogayaashu; **(3)** in la kordhiyo aqoonta falanqaynta dakhli sharci darro ah; **(4)** in laga doodo caqabadaha la xiriiira soo kabashada hanti; **(5)** in la is-weydaarsado aragtiyaha hay'adaha sharciga; iyo **(6)** in la helo jawaab-celin wax ku ool ah si loo horumariyo tababarada mustaqbalka.

### 2.2. Guulaha La Gaaray

#### ✓ Fahamka ML/CFT

Korodhka fahamka dambiyada lacag-dhaqidda iyo hababka baarista maaliyadeed ee casriga ah.

#### ✓ Iskaashi Kordhay

Iskaashi sii kordhay oo dhex maray dacwad-oogayaasha iyo baarayaasha heerarka kala duwan.

#### ✓ Kalsooni Dheeraad Ah

Kalsooni dheeraad ah oo ku aaddan qabashada baaritaannada maaliyadeed ee qallafsan.

#### ✓ Jawaab-celin Qiimo Leh

Helidda xog iyo jawaab-celin muhiim u ah horumarinta barnaamijyada tababar ee soo socda.

### 3. Warbixinta Tababarka Dacwadaynta iyo Go'aaminta Dembiyada Tahriibka & Ka Ganacsiga Dadka

Warbixintani waxay ka warbixinaysaa tababar heer sare ah oo saddex maalmood socday oo ku saabsanaa Dacwadaynta iyo Go'aaminta Dembiyada Ka Ganacsiga Bani'aadamka iyo Tahriibka Dadka. Tababarkan ayaa lagu qabtay magaalada Muqdisho, gaar ahaan **Hoteel Afrik** intii u dhaxaysay **13–15 May 2025**. Ujeeddada ugu weyn waxay ahayd in la xoojiyo aqoonta iyo xirfadaha garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha si ay si hufan ugu wajahaan dembiyadaas culus ee ka dhanka ah bani'aadamnimada.



Presentation Session



Group Photo



Certificate Ceremony

#### 3.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Tababarku wuxuu diiradda saarayay in la gaaro ujeeddooyinka soo socda: **(1)** in la xoojiyo fahamka ka qaybgalayaasha ee dabeecadda iyo baaxadda dembiyada tahriibka iyo ka ganacsiga dadka; **(2)** in lagu baro shuruucda caalamiga ah iyo kuwa qaranka ee Soomaaliya ee la xiriira la-dagaallanka dembiyadaas; **(3)** in lagu horumariyo xirfadaha baarista, difaaca dhibbanayaasha, iyo dacwadaynta dembiilayaasha; iyo **(4)** in la dhiirrigeliyo iskaashi u dhexeeya hay'adaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya arrimahan.

#### 3.2. Guulaha laga gaarey Tababarka

##### ✓ Aqoon Korodh

Ka qaybgalayaashu waxay heleen faham qoto dheer oo ku saabsan dembiyada tahriibka iyo ka ganacsiga dadka.

##### ✓ Hormarinta Xirfada

Barashada xirfado la taaban karo oo la xiriira baarista, ilaalinta caddeymaha, iyo difaaca dhibbanayaasha.

##### ✓ Xoojinta Iskaashiga

Tababarku wuxuu kor u qaaday wadashaqeynta muhiimka ah ee u dhaxeysa daneeyayaasha gudaha iyo caalamiga ah.

##### ✓ Xirfad Sharciyeed

Ka qaybgalayaashu waxay si cad u fahmeen xeerarka qaran iyo kuwa caalami ee wax ka qabanaya dembiyadaas.



#### 4. Wajiga 2aad: Warbixinta Tababarka Dacwadeynta iyo Garsoorista Dambiyada Ka Ganacsiga Bani'aadamka

Machadka Tababarka Garsoorka Soomaaliyeed (MTG) ayaa si guul leh u qabtay tababar heer qaran ah oo loo fidiyay garsoorayaal iyo xeer-ilaaliyeyaal, kaas oo diiradda saarayay fahamka, dacwadeynta, iyo go'aaminta dambiyada ka ganacsiga dadka iyo tahriibka sharci darrada ah. Tababarka oo socday muddo **saddex maalmood** ayaa lagu qabtay **Hotel Afrik**, Muqdisho, intii u dhaxaysay **12 ilaa 15 Juun 2025**. Tababarkan waxaa ka qeybqaatey **22 qof** oo iskugu jira 13 Garsoore iyo 9 Xeer-ilaaliye.

Tababarku wuxuu qeyb ka yahay dadaallada joogtada ah ee lagu xoojinayo aqoonta iyo xirfadaha sharciyeed ee garsoorayaasha si ay si hufan ugu wajahaan dambiyada ba'an ee khatarta ku haya nolosha dadka.

##### 4.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Tababarku wuxuu lahaa ujeeddooyin muhiim ah oo lagu xoojinayo awoodda garsoorka, waxaana ka mid ahaa: **(1)** in la fahamsiiyo asalka, sababaha, iyo saamaynta ka ganacsiga dadka iyo tahriibka sharci darrada ah; **(2)** in la baro sharciyada Soomaaliya, kuwa caalamiga ah, iyo mawqifka shareecada Islaamka; **(3)** in la kobciyo xirfadaha baarista, ururinta caddeymaha, iyo go'aaminta dacwadaha; **(4)** in la fahamsiiyo kala duwanaanta u dhaxeysa ka ganacsiga dadka iyo tahriibka; iyo **(5)** in la dhiirrigeliyo wada shaqeynta hay'adaha gudaha iyo iskaashiga caalamiga ah si loo baabi'iyo dambiyadaas.

##### 4.2. Guulaha La Gaaray

###### ✔ Faham Qoto Dheer

Fahamka dabeecadda iyo baaxadda dambiyada ka ganacsiga dadka iyo tahriibka sharci darrada ah.

###### ✔ Aqoon Korodhin

Barashada sharciyada caalamiga iyo kuwa qaran iyo sida ay ugu adeegi karaan garsoorka.

###### ✔ Xirfado Cusub

Xirfadaha ururinta caddeymaha, ilaalinta maragga, iyo diyaarinta dacwadaha sharciyeed.

###### ✔ Dhiirrigelin Iskaashi

Wadashaqeyn dhaxal gal ah oo u dhaxaysa garsoorayaasha, xeer-ilaaliyeyayaasha, iyo hay'adaha kale.

###### ✔ Wacyigelinta Bulshada

Kobcinta fahamka doorka ay warbaahinta iyo bulshada rayidka ku leeyihiin kahortagga dambiyadaas.

## 5. Warbixinta Tababarka Garsoorayaasha iyo Xeer-ilaaliyeyaasha ee ka Dhacay Qaahira

Machadka Tababarka Garsoorka Soomaaliyeed ayaa sii xoojinaya dadaallada uu ugu jiro tayeynta cadaaladda dalka, isaga oo fursado dibadeed u abuura garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha si ay u helaan aqoon iyo xirfado dheeraad ah oo caalami ah. Dadaalladaas qaybtood waxaa ka mid ah tababar muhiim ah oo lagu qabtay magaalada **Qaahira ee dalka Masar**, intii u dhaxaysay **14 ilaa 19 Abriil 2025**. Tababarkan oo socday muddo 5 maalmood, waxa uu diiradda saarayay caddeymaha iyo xukunka ciqaabta (criminal evidence and sentencing).



### 5.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Tababarku waxa uu lahaa ujeeddooyin muhiim ah oo la xiriira tayeynta garsoorka, gaar ahaan: **(1)** in kor loo qaado fahamka iyo xirfadaha la xiriira ururinta, qiimeynta, iyo adeegsiga caddeymaha ee dacwadaha ciqaabta; **(2)** in la xoojiyo aqoonta sharciyeed ee la xiriirta xukunka ciqaabeed iyo cabbirrada sharciyeed; **(3)** in la is-dhaafsado khibrad iyo waayo-aragnimo caalami ah si loo helo garsoor casri ah; iyo **(4)** in la kobciyo kartida garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha ee go'aan qaadashada ku saleysan caddeymo sax ah iyo ciqaab caddaalad ku dhisan.

### 5.2. Guulaha la Gaaray

#### ✔ Fahamka Caddeymaha

Faham buuxa oo ku saabsan caddeymaha iyo doorkooda muhiimka ah ee go'aan garsoor.

#### ✔ Go'aan Gaarista

Awood la xoojiyay oo ku saabsan xukun ciqaabeed oo caddaalad iyo sharciyad isku dheelli tiran.

#### ✔ Iskaashi Gudaha

Is-dhexgal korodhay oo u dhexeeya garsoorayaasha heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

#### ✔ Khibrad Caalami ah

Waayo-aragnimo la wadaagay garsoorayaal iyo tababarayaal Masri ah oo khibrad sare leh.

## 6. Tababbarka Xeerka Qoyska iyo Xeerka Habka Madaniga

Warbixintani waxay faahfaahinaysaa barnaamij tababar oo ku saabsanaa Sharciga Qoyska iyo Maamulka Garsoorka, kaas oo loo qabtay garsoorayaal ka kala socday Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada. Tababarku wuxuu ka dhacay Hotel Hayat, wuxuuna socday **4 maalmood** intii u dhaxaysay **13-kii ilaa 16-kii Sebtembar 2025**. Ujeeddada ugu weyn waxay ahayd in garsoorayaasha la siiyo aqoon iyo xirfado casri ah oo ay si hufan ugu maareeyaan dacwadaha la xiriira qoyska, isla markaana kor loogu qaado maamulka iyo hannaanka shaqo ee maxkamadaha.



### 6.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Tababarku wuxuu lahaa ujeeddooyin muhiim ah oo diiradda lagu saaray tayeeynta garsoorka: **(1)** in la xoojiyo fahamka garsoorayaasha ee sharciga qoyska iyo sida loo dabaqo marka la xalinayo dacwadaha; **(2)** in kor loo qaado xirfadaha maamulka garsoorka si loo yareeyo dib u dhacyada dacwadaha; **(3)** in la horumariyo hababka go'aan-qaadashada si ay u noqdaan kuwo caddaalad iyo hufnaan ku dhisan; **(4)** in la xoojiyo is-waafajinta iyo isku mid ahaanshaha go'aannada garsoorka ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed; iyo **(5)** in la dhiirrigeliyo anashaxa garsoorka, isla-xisaabtanka, iyo mas'uuliyadda shaqo ee garsoorayaasha.

### 6.2. Guulaha Laga Gaaray

#### ✓ Aqoon Qoto Dheer

Garsoorayaashu waxay heleen aqoon ballaaran oo ku saabsan sharciga qoyska iyo maamulka.

#### ✓ Kalsoonida Garsoorka

Waxaa kor u kacay kalsoonida garsoorayaasha ee ku aaddan maareynta dacwadaha qoyska.

#### ✓ Maamulka Maxkamadaha

Waxaa la xoojiyay maamulka maxkamadaha iyo habraacyada shaqo ee garsoorka.

#### ✓ Is-dhaafsi Khibradeed

Waxaa la helay is-dhaafsi khibradeed oo u dhexeeya garsoorayaasha Federaalka iyo FMS.

#### ✓ Tayada Caddaaladda

Tababarku wuxuu gacan ka geystay kor u qaadista tayada caddaaladda iyo gaarsiinta garsoor hufan oo bulshada kalsooni ku qabto.

## 7. Tababbarka Qorista Xukumada ee Garsooreyaasha

Warbixintani waxay bixinaysaa faahfaahin ku saabsan Tababarka qorista Xukunada Garsoorka (Judgment Writing) oo loo qabtay garsoorayaal ka kala socday Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada Federaalka. Tababarku wuxuu ka dhacay Hotel Hayat, wuxuuna socday **17-kii ilaa 25-kii Sebtembar 2025**. Ujeeddada tababarku waxay ahayd in la xoojiyo xirfadaha garsoorayaasha ee ku aaddan qorista go'aanno cad, sababeyn sharciyeed leh, isla markaana si sax ah loo fulin karo.



### 7.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Ujeeddooyinka ugu waaweyn ee tababarka waxay ahaayeen: **(1)** In garsoorayaasha la siiyo aqoon dhameystiran oo ku saabsan mabaadi'da iyo farsamooyinka qorista go'aannada garsoorka; **(2)** In la hagaajiyo caddeynta, sababeynta sharciyeed, iyo qaab-dhismeedka go'aannada maxkamadaha; **(3)** In garsoorayaasha ay si qoto dheer u fahmaan saameynta sharciyeed iyo fulinta go'aannadooda; iyo **(4)** In la bixiyo layliyo iyo dood cilmiyeedyo wax ku ool ah oo kor u qaadaya xirfadaha qorista go'aannada.

### 7.2. Guulaha Laga Gaaray

#### ✔ Xirfado Sare

Garsoorayaashu waxay heleen xirfado sare oo ku saabsan qorista go'aanno nidaamsan, cad, oo sharci ahaan adag.

#### ✔ Sababeyn Sharciyeed

Waxaa si muuqata u hagaagay tayada sababeynta sharciyeed ee go'aannada ay qorayaan garsoorayaashu.

#### ✔ Fulinta Go'amada

Tababarku wuxuu xoojiyay fahamka garsoorayaasha ee fulinta go'amada maxkamadaha iyo saameyntooda.

#### ✔ Is-weydaarsi Khibradeed

Waxaa la sameeyay is-weydaarsi khibradeed oo wax ku ool ah oo u dhexeeya garsoorayaasha Federaalka iyo FMS.

#### ✔ Hufnaanta & Kalsoonida

Tababarku wuxuu gacan ka geystay kor u qaadista hufnaanta iyo kalsoonida caddaaladda, taas oo sare u qaaday tayada adeegga garsoorka.

## 8. Tabbarka Xeerka Habka Ciqaabta ee Garsooreyaasha iyo Xeerilaaliyayasha

Machadka Tababarka Garsoorka (JTI), iyadoo taageero ka helaya **Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta Sharciga (IDLO)**, ayaa si guul leh u qabtay tababar socday saddex maalmood oo ku saabsanaa Xeerka Habraaca Dambiyada (Criminal Procedure Code), kaas oo ka dhacay **16-kii ilaa 18-kii Agoosto 2025** hotelka Afril Hotel, Muqdisho. Tababarkan waxaa ka faa'iideystay garsoorayaal iyo xeer-ilaaliyayaal ka kala yimid Jubaland, Koonfur Galbeed, Galmudug, iyo Hirshabelle.



Certificate Presentation Ceremony



Participants Group Photo

### 8.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Ujeeddooyinka tababarku waxay isugu jireen: **(1)** xoojinta aqoonta Xeerka Habraaca Dambiyada ee Soomaaliya; **(2)** kor u qaadista awoodda lagu dabaqi karo sharciga si joogto ah; **(3)** hagaajinta fahamka habraaca sharciga ah (due process) iyo xuquuqda eedaysanaha; **(4)** dhiirrigelinta is-waafajinta habraacyada dacwadaha ee u dhexeeya dowlad-goboleedyada; **(5)** dhisidda xirfadaha farsamo ee marxaladaha kala duwan ee dacwada; **(6)** kordhinta wacyiga ilaalinta xarigga sharci-darrada ah; **(7)** horumarinta xirfadaha iyadoo loo marayo jilid iyo daraasado kiis; iyo **(8)** dhiirrigelinta anshaxa iyo isla-xisaabtanka garsoorka.

### 8.2. Guulaha Laga Gaaray

#### ✓ Aqoon Korodh

Kor u kac muuqda oo ku yimid aqoonta habraacyada dacwadaha dambiyada iyo marxaladaha maxkamadeynta.

#### ✓ Isku-mid ahaansho

Hagaajinta adeegsiga sharciga habraaca dambiyada si loo yareeyo khaladaadka habraaca.

#### ✓ Xuquuqda Aasaasiga

Fahamka xuquuqda maxkamadeyn cadaalad ah, eex-la'aanta, iyo ka hortagga xarig sharci-darro ah.

#### ✓ Xirfado Wax-ku-ool ah

Horumarinta xirfadaha iyada oo loo marayo daraasado kiis iyo jilid (role plays) la xiriira shaqada.

#### ✓ Wada-shaqeyn & Is-waafajin

Kobcinta isku-duwidda dacwadaha dambiyada ee u dhexeeya garsoorayaasha heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

#### ✓ Anshaxa & Xirfadda

Kor u qaadista anshaxa garsoorka, isla-xisaabtanka, eex-la'aanta, iyo mas'uuliyadda shaqo.



## 9. Tababarka Gorgortanka Qirashada Dacwadaha Ciqaabta

Tababarka Gorgortanka Qirashada Dacwadaha Ciqaabta (Plea Bargaining in Criminal Cases) ayaa si guul leh loo qabtay **10–11 Sebtembar 2025**, wuxuuna ka dhacay Hotel Jazeera, Muqdisho. Tababarkan waxaa ka qaybgalay **70 ka-qaybgalayaal** oo isugu jiray garsoorayaal, xeer-ilaaliyayaal, iyo qareenno heer federaal ah. Ujeeddada tababarku waxay ahayd in la xoojiyo fahamka iyo adeegsiga habka gorgortanka qirashada si loo dardargeliyo xallinta dacwadaha iyo yaraynta ciriiriga maxkamadaha.

### 9.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Tababarku wuxuu lahaa lix ujeedo oo muhiim ah: **(1)** In la xoojiyo fahamka fikradda iyo shuruudaha gorgortanka qirashada ee dacwadaha ciqaabta; **(2)** In la caddeeyo doorka garsoorayaasha, xeer-ilaaliyayaasha, iyo qareennada; **(3)** In la dhiirrigeliyo adeegsiga habkan si sharci iyo anshax leh; **(4)** In la yareeyo dib-u-dhacyada dacwadaha iyo ciriiriga maxkamadaha iyada oo la adeegsanayo habab xal-dedejin ah; **(5)** In la hubiyo ilaalinta xuquuqda eedaysanaha iyo dhibbanaha; iyo **(6)** In la horumariyo xirfadaha wada-hadalka iyo go'aan-qaadashada.

### 9.2. Guulaha Laga Gaaray

#### ✔ Aqoon Korodh

Kor u kac ku yimid aqoonta iyo fahamka ku saabsan gorgortanka qirashada dacwadaha ciqaabta.

#### ✔ Xirfadaha Wada-shaqeynta

Hagaajin ku yimid wada-shaqeynta u dhexeeya garsoorayaasha, xeer-ilaaliyayaasha, iyo qareennada.

#### ✔ Aragtiyo Wax-ku-ool ah

Ka-qaybgalayaashu waxay heleen aragtiyo ku saabsan sida gorgortanka loogu dabaqi karo kiisaska dhabta ah.

#### ✔ Ilaalinta Xuquuqda

Waxaa la xoojiyay ilaalinta xuquuqda sharciga ah ee dhammaan dhinacyada dacwadaha.

#### ✔ Hufnaanta & Degdegga

Tababarku wuxuu gacan ka geystay kor u qaadista hufnaanta iyo yaraynta culayska saaran maxkamadaha.



## 10. Tababarka La-Dagaallanka Maalgelinta Argagixisada

Tababarka IJ (Institute for International Justice) ee ku saabsanaa La-Dagaallanka Maalgelinta Argagixisada (Countering the Financing of Terrorism – CFT) ayaa si guul leh loo qabtay **13-14 Febraayo 2025** wuxuuna ka dhacay **Nairobi, Kenya**. Tababarkan waxaa ka qaybgalay garsoorayaal iyo xeer-ilaaliyayaal Soomaaliyeed, kuwaas oo ka kala yimid hay'adaha caddaaladda ee dalka. Ujeeddada tababarku waxay ahayd in la xoojiyo awoodda garsoorka iyo xeer-ilaalinta Soomaaliyeed ee ku aaddan fahamka, ka hortagga, iyo la-dagaallanka maalgelinta argagixisada, taas oo halis weyn ku ah amniga, xasilloonida, iyo nidaamka sharciga ee dalka.

### 10.1. Ujeeddooyinka Tababarka

Tababarka wuxuu lahaa lix ujeedo oo muhiim ah: **(1)** in la xoojiyo fahamka garsoorayaasha ee fikradda iyo hababka maalgelinta argagixisada; **(2)** in la kordhiyo aqoonta xeerarka qaran iyo heshiisyada caalamiga ah ee CFT; **(3)** in la horumariyo xirfadaha baarista, dacwad-oogista, iyo xukunnada la xiriira dambiyadan; **(4)** in la dhiirrigeliyo iskaashi u dhexeeya garsoorka, xeer-ilaalinta, iyo hay'adaha amniga; **(5)** in la xoojiyo ilaalinta xuquuqda sharciga ah inta lagu guda jiro la-dagaallanka argagixisada; iyo **(6)** in la kordhiyo wacyiga ku saabsan muhiimadda ka hortagga maalgelinta argagixisada.

### 10.2. Guulaha Laga Gaaray

#### ✔ Aqoon Korodh

Kor u kac ku yimid aqoonta iyo fahamka ka-qaybgalayaasha ee ku saabsan hababka looga hortago maalgelinta argagixisada.

#### ✔ Xirfado Wax-ku-ool ah

Ka-qaybgalayaashu waxay heleen xirfado wax ku ool ah oo la xiriira la-tacaalidda kiisaska argagixisada.

#### ✔ Iskaashi Xooggan

Waxaa la xoojiyay iskaashi iyo wada-shaqeyn u dhexeeya garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha Soomaaliyeed.

#### ✔ Kalsoonida Xirfadlayaasha

Tababarku wuxuu sare u qaaday kalsoonida xirfadlayaasha sharciga ee maaraynta dacwadaha argagixisada.

#### ✔ Khibrad Caalami ah

Is-weydaarsi khibradeed iyo aqoon caalami ah oo ka caawisay ka-qaybgalayaasha inay la jaanqaadaan hababka caalamiga ah ee CFT.



## 11. Horumarinta Xogta Furan ee Dijitaalka ah (OSINT)

Machadka Caalamiga ah ee Caddaaladda iyo Xukunka Sharciga (IJJ) ayaa Machadka Tababarka Garsoorka ku casuumey aqoon-is-weydaarsi muhiim ah oo ku saabsan “Horumarinta Qaab-dhismeedyo iyo Habraacyo Wax-ku-ool ah oo loogu adeegsado Xogta Furan ee Dijitaalka ah (Digital Open-Source Intelligence – OSINT) sida Caddeyn Maxkamadeed”. Barnaamijkan oo socday **laba maalmood** ayaa la qorsheeyay **Sebtembar 2025**.

Aqoon-is-weydaarsigan wuxuu diiradda saarayaa sida xogta furan ee dijitaalka ah (sida warbaahinta bulshada iyo ilaha dadweynaha) loogu adeegsan karo caddeyn sharci ah. Waa barnaamij muhiim u ah xoojinta awoodda garsoorka si ay ula jaanqaadaan horumarka tiknoolajiyadda casriga ah.

### 11.1. Ujeedooyinka Aqoon-is-weydaarsiga

Ujeedooyinka ugu waaweyn waxaa ka mid ahaa: **(1)** in la xoojiyo fahamka OSINT iyo doorkeeda caddeyn ahaan; **(2)** in la horumariyo habraacyo cad oo lagu ururiyo laguna keydiyo xogta dijitaalka ah; **(3)** in la kordhiyo awoodda qiimeynta saxnaanta caddeymaha; **(4)** in la fahmo shuruudaha sharciyeed ee aqbalidda caddeynta dijitaalka ah; **(5)** in la dhiirrigeliyo adeegsiga habab caalami ah; iyo **(6)** in la kobciyo iskaashi dhexmara hay’adaha caddaaladda.

### 11.2. Guulaha Laga Gaaray

#### ✔ Aqoon Casri ah

Kor u kac ku yimid aqoonta isticmaalka xogta furan ee dijitaalka ah sida caddeyn maxkamadeed.

#### ✔ Habraacyada OSINT

Faham qoto dheer oo laga helay habraacyada ururinta iyo ilaalinta caddeymaha dijitaalka ah.

#### ✔ Hubinta Saxnaanta

Xoojinta awoodda lagu hubinayo kalsoonida iyo saxnaanta caddeynta dijitaalka ah ee la horkeeno maxkamadda.

#### ✔ Diyaar-garowga Tiknoolajiyadda

Hagaajinta awoodda hay’adaha caddaaladda si ay ula qabsadaan dambiyada casriga ah iyo caddeymaha elektarooniga ah.

#### ✔ Is-weydaarsi Caalami ah

Xoojinta is-weydaarsiga khibrada iyo aqoonta caalamiga ah ee la xiriirta OSINT, taas oo sare u qaadday tayada dacwadaha.




### 3.0 TABABARRO IYO AQOON-IS-WEYDAARSIYO LA QABTAY – 2025


#	Magaca Tababarka / Aqoon-is-weydaarsiga	Dowlad Goboleed	Ka-qayb galayaal	MUDADA	GARSOOR	Xeer Ilaliya	KAALIYA	QAREEN	BAARE	Jinsiga (M / F)
1	Tababarka Kaaliyeyaasha Cusub ee Federaalka	0	41 qof	25 Jan – 13 Feb 2025	0	0	41	0	0	36 M / 5 F
2	Tababar Wadajir ah: La-Dagaallanka Lacag-Dhaqidda & Argagixisada	0	36 qof	26–28 Jan 2025	0	29	0	0	7	31 M / 5 F
3	Tababarka Dacwadeynta & Go'aaminta Dembiyada Tahriibka	0	25 qof	13–15 May 2025	15	10	0	0	0	25 M / 0 F
4	Wajiga 2aad: Tababarka Dacwadeynta Tahriibka & Ganacsiga Dadka	0	22 qof	12–15 Jun 2025	13	9	0	0	0	22 M / 0 F
5	Tababarka Garsoorayaasha & Xeer-ilaaliyeyaasha – Qaahira, Masar	0	15 qof	14–19 Apr 2025	15	0	0	0	0	15 M / 0 F
6	Tababarka Xallinta Khilaafaadka	0	43 qof	16–19 Jun 2025	30	0	0	13	0	39 M / 4 F
7	Tababarka Xeerka Qoyska & Xeerka Habraaca Madaniga (FGS & DG)	0	28 qof	13–16 Sep 2025	28	0	0	0	0	28 M / 0 F
8	Tababarka Qorista Xukunnada ee Garsoorayaasha Federaalka & DG	0	27 qof	17–25 Sep 2025	27	0	0	0	0	27 M / 0 F
9	Tababarka Xeerka Habraaca Ciqaabta (DG)	0	20 qof	16–18 Aug 2025	15	5	0	0	0	19 M / 1 F
10	Tababarka Gorgortanka Qirashada Dacwadaha Ciqaabta	0	67 qof	10–11 Sep 2025	33	20	0	14	0	60 M / 7 F
11	Tababarka La-Dagaallanka Maalgelinta Argagixisada	0	16 qof	13–14 Feb 2025	0	16	0	0	0	12 M / 4 F
12	Aqoon-is-weydaarsi: Adeegsiga Xogta Furan ee Dijitaalka ah	0	5 qof	Sep 2025	3	2	0	0	0	5 M / 0 F
13	Tababarka Ka-Hortagga Falalka Argagixisada – Turkey	0	10 qof	14–20 Dec 2025	6	4	0	0	0	10 M / 0 F
—	WADARTA GUUD	0	355	—	185	95	41	27	7	329 M / 26 F



# GUUD-MAR XOGTA KA-QAYBGALAYAASHA TABABBARRADA



## Kala-Baxa Sida Ay U Kala Dooryihiin (Breakdown by Role)






# TABABARRADA 2025

GUUD-MAR

## Tababbarradda Bille u Qabsoomey



Wadarta Guud (Total Trainings)

**13 Tababbar**



## KORORKA TABABARRADA IYO KA-QAYBGALAYAASHA (2022 - 2025)


**51** Wadarta Tababar (2022-25)

**1,707** Wadarta Guud Ka Qaybgale

**893** Sanadka u badan (2024)

● Tababarrada (Trainings)

● Ka-Qaybgalayaasha (Participants)



**Falanqaynta Xogta:** Jaantuskani wuxuu muujinayaa koboca tababarada iyo ka-qaybgalayaasha muddo afar sano ah (2022–2025). Sanadkii 2024 ayaa ahaa sanadkii ugu sarreeyay dhanka tababarrada la qabtay, halka 2025 uu muujinayo hoos u dhac tababarradda iyadoona la qabtay **13 tababar** oo ay ka faa'iideysteen **355 xubnood**. Wadarta guud ee afarta sano ayaa gaartay **1,707** ka-qaybgale, taas oo muujinaysa guul la taaban karo oo laga gaaray dhisidda awoodda garsoorka dalka.



# WARBIXIN SANNADDEEDKA 2025

ANNUAL REPORT 2025

---

